

Amarka L. 79. Rep.

Xeerarka ku saabsan dambiyada ay dhigayaan xeerka ciqaabta milateri ee ay galaan xubno ka tirsan Ciidanka Asluubta.

MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAMULAHAA

Marka uu arkay xeerka 8 Febberaayo 1950, lamba. 12;

Marka uu arkay dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee taariikhda 31 Maarsio 1950;

Marka uu arkay amarka lamba. 5 ee ku saabsan maqaamka ku-meelgaarka ee sharci ee Dalka;

Marku uu Garowsaday baahida loo qabo wax ku-oolnimo dheeraada oo ballanqaadaya adeegyada xabsiyada waxna laga baddalo qaybo ka mida xeerarka uu soo saaray Maamulkii Ingiiska si loo nidaamiyo xiriirkha shaqo ee ilaalada xabsiyada;

Kurmaynaya awoodaha la siiyay;

WUXUU AMAR KU SOO SARAYAA

Qod. 1

Ciidanka ilaalida xabsiyada oo u abaabulan qaab ciidan, waxay ka mid yihiin ciidamada qalabka sida kuwaaso lagu aaminay soo celinta kala dambaynta iyo ammaanka guud ee Dalka.

Qod. 2

Marka la eego xilalka loo igmaday xubnaha Ciidanka ilaalada xabsiyada uu ka koobanyahay waxaa qabanaya dambiyada u dagsan xeerka ciqaabta ciidamada talyaaniga, ciqaabaha xeerkaasu jidaynayo iyadoo lagu qaadayo walaayadda garsoorka talyaaniga.

Qod. 3

Iqtisaaska garsooridda dambiyada ay galaan xubnaha Ciidanka ilaalada xabsiyada, eek u cad qod.40 ee bayaanka lr. 16 ee 1941, waxaa loo soo wareejiyay waalaayadda ciidamada, xaaladaha ku saabsan jabinta kuwaaso ah dambi sida uu qabo xeerka dambiyada ciidamada talyaaniga.

Qod. 4

Amarkaan wuxuu dhaqngalayaa 1 Disember 1950.

Muqdisho, 15 Nofember 1950.

Maamulaha

Gorini